

## Qaaxada

### KA WARAN HADDII AAN QAATAY TALLAALKA BCG?

Dalal badan oo ka baxsan Maraykanka ayuu tallaalka Bacille Calmette-Guerin (BCG) qayb ka yahay barnaamijkooda xakamaynta qaaxada (TB), gaar ahaan midka loogu talagalay dhallaanka. Waxtarka tallaalka BCG wuu kala duwan yahay, oo awoodda kahortagga cudurka qaaxada (TB) ee la kala qaadi karo ayaa si aad ah u naaqusta muddo kadib.

Tallaalka BCG ayaa keeni kara falcelin been togan ah marka Qaaxada (TB) laga baaro maqaarka. Baaritaanada dhiig ee qaaxada (TB) wax saamayn ah kuma yeeshaan talaalka BCG mana soo saaraan natiijo baaris oo been togan ah. Haddii aad qaadatay tallaalka BCG (aad u qadatay tallaalka ahaan ama daawayn kansar ahaan midkood), baaritaanka dhiig ayaa doorbidaada leh.



## Iowa HHS Tuberculosis Program (Barnaamijka Qaaxada ee Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha (HHS) ee Iowa)

Lucas State Office Building  
321 East 12th Street  
Des Moines, IA 50319-0075

[hhs.iowa.gov/public-health/tb](https://hhs.iowa.gov/public-health/tb)



Health and  
Human Services  
Public Health

Ogow xaqiiqada ku saabsan

## Qaaxada (TB)



Health and  
Human Services  
Public Health

**Qaaxadu (TB)** ma ahan oo keliya cudur jiri jiray. Caalamka oo idil, Qaaxadu weli waxaa u dhinta in ka badan 1 milyan oo qof sannadkii. Haddii aan la daawayn, waxaa u dhiman doona 1 ka mid ah 2 qof walba oo qabta cudurka qaaxada (TB) firfircoon.

### WAA MAXAY QAAXO (TB)?

Qaaxadu waa cudur ay keento bakteeriyada (jeermis) oo hawada lagu kala qaado. Qaaxadu waxay inta badan ku dhacdaa sambabada (tiibishada sambabada) balse waxay sidoo kale saamaysaa qaybaha kale ee jirka, sida maskaxda, qanjihada ama lafdhabarta.

### SIDEE AYAA QAAXADA (TB) LAGU KALA QAADAA?

Jeermiska qaaxada (TB) ayaa la qaadaa marka qofka qaba cudurka tiibishada ee socda uu qufaco, hindhiso, hadlo ama heeso. Dadka jiida neefta jeermiska qaaxada (TB) leh ee ku jirta hawada ayaa qaadi kara cudurka. Qof walba jirro kama qaado bakteeriyada qaaxada (TB). Sidaas awgeed, waxaa jira laba xaaladood oo lala xiriiriyo qaaxada (TB), qaaxada (TB) firfircoonayn ama qaaxada dhakan (LTBI) iyo qaaxada (TB) firfircoon.

### Muxuu yahay farqiga u dhexeeya qaaxada (TB) firfircoonayn iyo qaaxada (TB) firfircoon?

#### QAAXADA (TB) FIRFIRCOONAYN

Dadka qaba qaaxada (TB) firfircoonayn waxaa jirkooda ku jira bakteeriyada qaaxada (TB) balse jirro kuma rido sababtoo ah jeermisku ma firfircoona. Dadka qaba qaaxada (TB) firfircoon ee aan la daawaynin waxay halis ugu jiraan inay noqoto cudurka Qaaxada ee firfircoon. Daawaynta qaaxada (TB) firfircoon ayaa si adag loogu taliyaa si bakteeriyada qaaxada aysan u noqon mid firfircoon oo aysan u keenin qaaxada (TB) firfircoon.

#### QAAXADA (TB) FIRFIRCOON

Dadka qaba cudurka qaaxada (TB) firfircoon waxaa jirro ku rida bakteeriyada qaaxada (TB) firfircoon ee ku jirta jirkooda. Astamaha cudurka qaaxada (TB) firfircoon ee ku dhacda sambabada waxaa ku jira: qufacida in ka badan saddex toddobaad, hoos u dhac ku yimaada miisaanka oo aan la garanayn, qandho, dhidid habeenkii iyo daal. Dadka qaba cudurka qaaxada (TB) firfircoon waxay jeermiska qaaxada (TB) u gudbin karaan dadka kale. Cudurka qaaxada (TB) firfircoon si wax-ku-ool ah ayaa loo daawayn karaa. Haddii aysan iska daawayn, dadka qaba cudurka qaaxada

(TB) firfircoon aad ayay u xanuunsan karaan wayna u dhiman karaan.

### Sidee la isaga qaaxada (TB)?

#### BAARITAANKA MAQAARKA

Baaritaanka maqaarka ee qaaxada (TB) waa nooca ugu badan ee loo baaro qaaxada (TB). Cudduda ayaa baaritaanka lagu sameeyaa iyadoo qadar yar oo dareere ah (tuberculin) lagu duro maqaarka hoostiisa. Bixiyaha daryeelka caafimaadkaaga ayaa eegi doona cuddudaada 48-72 saacadood kadib baaritaanka maqaarka ee qaaxada (TB) si loo go'aamiyo inay natiijo tahay mid "togan" ama "taban."

#### BAARITAANKA DHIIGGA

Habka kale ee qaaxada (TB) la isaga baari karo waa iyadoo loo marayo baaritaan dhiig oo gaar ah. Baaritaanka dhiigga ayaa cabbira sida habdhiska difaaca jirkaagu uga falceliyo bakteeriyada keenta qaaxada (TB). Bixiyaha daryeelka caafimaadkaaga ayaa dhiig ka qaadi doona cuddudaada si uu u sameeyo baaritaankan. Keliya hal booqasho ayaa waajib ah, natiijooyinkana badanaa waxaa lagu helaa dhowr maalmood gudahooda.

#### Qaaxada (TB) firfircoonayn

Baaritaanka qaaxada (TB) ee togan (baaritaanka maqaarka ama dhiigga)

Raajada xabadka ee caadiga ah

Ma lahan astaamo

Ma faafto

Waa in la iska daaweeyo qaaxada (TB) firfircoonayn si looga hortago inay noqoto qaaxada (TB) firfircoon

#### Qaaxada (TB) fitfircoon (Sambabada)

Baaritaanka qaaxada (TB) (maqaarka ama dhiigga) badanaa wuxuu soo saaraa natiijo togan balse waxaa laga yaabaa inuu yahay mid taban ama aan go'aan laga gaari karin

Raajada xabadka ee aan caadiga ahayn

Astaamaha: Qufacida wax ka badan 3 isbuuc, hoos u dhaca miisaanka ee aan la garanayn, qandho, dhidid iyo daal habeenkii

Dabcan way faaftaa

Antibiyootig ayaa lagu daawayn karaa



### KA WARAN HADDII LAGAA HELO CUDURKA QAAXADA (TB)?

Haddii baaritaanka maqaarka ama dhiigga midkood uu noqdo mid togan, waxay u badan tahay inaad qaaday jeermiska (TB). Bixiyaha daryeelka caafimaadkaaga ayaa ku saari doona raajada xabadka si loo hubiyo in caabuqa qaaxada (TB) uusan noqon cudurka qaaxada (TB) firfircoon. Haddii aad qufacayso, ama natiijada raajada xabadka ay tahay mid aan caadi ahayn, baaritaan dheeraad ah ayaa loo baahan karaa.

### HADDII LA IGA HELO CUDURKA QAAXADA (TB), MA IN LA IGA DAWEYAA?

Haa, daawayn ayaa had iyo jeer lagula taliyaa dadka laga helo qaaxada (TB). Hababka daawaynta qaaxada (TB) firfircoonayn ee la doorbido waxay caadi ahaan ku lug leeyihiin qaadashada antibiyootig muddo 3-4 bilood ah. Markaad qaadata antibiyootiga si lagaaga daaweeyo qaaxada (TB) firfircoon, halista aad ugu jirto cudurka qaaxada (TB) firfircoon ayaa hoos u dhici karta 70-90% inta aad nooshahay. Waa muhiim in la qaato dhammaan daawooyinka antibiyootiga si looga hortago in qaaxada (TB) firfircoonayn ay noqoto cudurka qaaxada (TB) firfircoon.

Cudurka qaaxada (TB) firfircoon waa la daawayn karaa iyadoo la qaadanayo dhawr antibiyootik muddo 6-12 bilood ah. Aad ayay muhiim u tahay in dadka qaba cudurka qaaxada (TB) firfircoon ay qaataan antibiyootiga oo dhan oo ay u qaataan sida loogu talagalay. Haddii dadku si dhakhso ah u joojiyaan qaadashada antibiyootiga, way bukoon karaan mar kale. Haddii aadan si sax ah u qaadan antibiyootiga, jeermiska weli nool ayaa laga yaabaa inay wax ka tari waydo daawada antibiyootiga. Barnaamijka Xakamaynta Qaaxada, ee Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha (HHS) ee lowa ayaa bixiya daawooyinka Qaaxada si la isaga daaweeyo Qaaxada (TB) firfircoonayn iyo cudurka qaaxada (TB) firfircoon si bilaashka ah.